**DEKREETO MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Lamb. 87 ee 1da Maarso 1971**

**Xeer Nidaamiyaha habka Guddiga Dhaqaalaha ee Hey'adaha la qarameeyey**

**MADAXWEYNAHA**

**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

KADIB markii la arkay Axdiga Kowaad ee Kacaanka Sharci no. 1 ee 21 Oktoobar 1969, Sharciga lambar 1 ee 21 Oktoobar 1969;

KADIB markii la tixgeliey qod. 3 iyo 4 ee Sharciga lamb. 26 ee 7 Maay 1970;

KADIB markii laga baaran degay baahidda loo qabo in la habeeyo awoodaha iyo howlaha Guddiga Dhaqaalaha ee Hey'adaha la qarameeyey oo laga doonaayo in ay hirgeliyaan howlaha Guddiyada lagu tilmaamay qod. 3 ee Sharciga lamb. 26 ee 7 Maay 1970 .

**WUXUU XEERAYNAYAA**

**Qod. 1**

Guddiga Dhaqaalaha ee Hey'adha la Qarameeyey oo saldhigeedu yahay Muqdishu, xafiiska Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka, wuxuu isku soo uruurin doona waxaana lagu beddeli doonaa Guddiyada qaabilsan bixinta magdhawyada hey'adaha la qarameeyey sida ku qoran lamb. 36 ee qod. 3 Sharci 7 Maay 1970, wuxuuna ku shaqeyn doonta xeer hoosadka ee sharcigaan.

Guddiga waxaa loo hibeyey awood ballaran ee la xiriirta bixinta iyo fulinta heshiisyada magdhawga la siin doono hantileeyaasha.

**Qod. 2**

Guddigu, kadib markii ay ka baraan deggay codsiyada dadka hantileeyaasha ee shirkadaha iyo hey'adaha lala wareegay, waxaay shiraar gaar gaar ah lala yeelan doono si lagu dhaqaaqo heshiis dhex mara iyo bixinta magdhawyada.

Shirarkaasi waxay ka soo qeyb geli doonan hantileeyda ama ciddii wakiil ay ka dhigteen oo haysta wakiilasho sharci ah iyo khabiiro maaliyeed oo ilaa iyo 3 qofood ah

Magacyada khabiirada maaliyadda waa in shirka ka hor lo soo gudbiyaa Guddiga, kuwaaso oo haddii la qoonsaday oo Guddiga diidi karo ka soo qeyb galkooda.

Shirarka waxaa loo ogolaan kara, wakill ka socda Dowlada oo leh maskabka in uu keliya u ka baraan dego codsiga hantileeyda shirkadaha lala wareegay.

Kullamadaasi waxaa haggi doona Guddomiyha Guddiga oo uu Xoghayahu taakuleyn doono, kaas oo warbixin ka qori go'aanadda kullanka, warbixintaasi oo ka mid noqon doonta qoraallada Guddiga.

**Qod. 3**

Ka hor intii uusan kullanka dhicin, Guddigu wuxuu awood ballaran u leeyahay in uu weydiisto iyadoo muddo ku filan la siin doono, hantileeyda shirkadda lala wareegay in ay soo gudbiyaan macluumaadka, caddeymaha iyo qorrallada loo baahan yahay.

Hantileeyda shirkadaha ama hey'adaha lala wareegay, waxay xaq uu leeyihiin in aay muddada loo qabtay in ay soo gudbiyaan xatta tusaalooyin muqaal ah oo sharciyeeysan oo ay saxiixeeyn ama laga saxiixay ciddi wakiilka u ah.

**Qod. 4**

Kadib markii uu Guddigu soo uruursaday macluumaadka iyo caddeymaha oo uu weydiistay wuxuu ku dhaqaaqi doona barista xaaladda Shrikaadda lala wareegay isagoo codanaya wixii macluumaad dheerad ah ee loo bahdo si loo dhameeystiro qiimeynta magdhawga la codsaday.

Baarista xaaladda Shirkadda kadib, Guddigu wuxuu joo jeedin doonaa go'aanadiisa ku qotoma codsiga oo uu soo qortay hantilaha.

**Qod. 5**

Go'aanadda oo la sababeeyey iyadoo tariikhda lagu qoray waxaa saxiixi doono Guddomiyha iyo Xubin kasta iyo Xoghayha Guddiga waxaana lagu keydin doona xafiiska Xoghaynta eee isla Guddiga.

Qoraalka go'aanka waxaa Xoghayanta ay ku wargelin doonaa hantileyaasha goobta ay ku carifeen warqada codsiga magdhawga ah iyadoo warqad rasmi ah boostata loo soo dhigi doono muddo 10 beri maalintii keyda lagu xareeyey.

Wargelinta qoraalkaasi wuxuu noqon kara mid gacanta loogu dhiibo hantileeyaasha ama wakiiladooda sharci iyadoo laga saxiixa helitaanka qoraalkaasi, kaas oo la geyn doono nuqulkiisa asliga ah keydka Xoghaynta.

**Qod. 6**

30 beri gudahooda maalintii ay heleen qoraalka rasmida sida ku tilmaaman qod. 5, hantileeyaashu waxay xaq u leeyihiin in ay soo gaarsiiyaan Xoghaynta Guddiga, qoraal diidma ah oo sharciyeesan oo ay iyagu soo saxiixeeyn ama wakiiladahoodu ay saxiixeen oo ka soo horjeeda go'aanadda ay Guddiga gaareen iyadoo lagu soo lifaaqi doono qoraallo iyo macluumaad dheeraad ah.

Qoraallada diidmada ah iyo dukumentiga dheeraad ah waa in la horgeeya Xoghayanta Guddiga 60ka beri ee ku xigta taarikha la helay codsiga.

Hantileeyaashu waxay mar kale codsan karaan in kullan kale uu Guddiga isugu yimaado, ama si toos ah loogugu yeero iyaga ama ciddi ay mas'uul ka dhigteen iyo khabiiradda maaliyadda iyo ciddi iska leh in ay ka baaran deegaan sida ku qoran faqradaha 2 iyo 3 ee qod. 12.

Haddii aysan jirin dib isugu soo noqosho go'aanka ee ku tilmaaman faqradda 1aad ee isla qodobkaani ama diidmada iyo qoraallada dheeraadka ah ee faqradda 2 ee isla qodobkaasi, g'aanadda ay Guddigu gaaray wuxuu noqon doonaan mid rasmi ah sida ku xusan qod. 4.

**Qod. 7**

Markii la horgeeyey caddeymaha didmada iyo qoraallada dheeradka ah ee ku tixan qod. 6, Guddigu kadib markii uu ka baraan dego macluumaadka iyo qoraalada la helay, wuxuu ku adkeeysan doona ama wax ka beddeli doonaa go'aanaddisa sida uu qabo qod 4.

Go'aanka Guddigu waa in la saxiixa, lana keydiya lana soo bandhigaa sida uu tilmaamayo qod. 5.

**Qod. 8**

Kadib markii hantileeyaashu codsadeen in mar kale Guddigu uu kullan yeesho, Guddigu wxuu sida ku qoran faqradda 3 ee qod. 6 isugu yeeri doona waqti go'an si loo gaaro go'aanka kama dambeysta ah.

Muddada kullanku waxaa lagu wargelin doona hantileeyaha ama wakiiladooda sharci si toos ah, iyadoo laga soo saxiisay qoraalka u sheegista, oo nuqulkiisa asliga ah lagu keydin doono Xoghayanta, ama lagu wargelin doono warqad rasmi ah oo 30 beri ka hor intii usan shirku dhicin loo dhigay boostada rasmiga ah.

**Qod. 9**

Dooda shirka ugu dambeeyo waxaa la raaci doona nidaamka ku qoran qod. 2.
Xubin ka tirsan Guddiga ayuu Guddomiyaha u wakiilan doonaa in uu qoro dooda iyo go'annada shirkaasi.

Xubintaasi waxaa si kooban u qori doonta habka go'aamidda ee Guddiga, tirada qoraallada iyo dukumentiga la hor keeay, wuxuu tilmaami doona qaabka iyo asbaabtaha go'aanadda uu Guddiga gaaray iyadoo laga baaran degey codsiga hantileyashu aay hor keeneen.

Guddimiyuhu wuxuu fursad siin doona hantileeyasha ama wakiiladoo, haddii loo bahdana khabiirada maaliyadda inay jeediyaan codsigooda.
Waxaa la ogol yahay in Xubinta Qoraaga ah, ama hantileeyasha ama ciddii wakiil u ah ama khabiirada in ay warbixin siiyaan kullanka.

Ciddi kale ee dan ka leh waxaay intii uu kullanka uu socdo u soo gudbin karaan Guddiga warbixin kooban oo taakuleeyn ah ee la xiriirta arrimaha laga doodaayo.

**Qod. 10**

60 beri gudahooda kadib markii kullanka Guddiga la yeeshay, Guddigu waa in uu u diraa keydka Xoghaynta go'aankiisa oo ay saxiixeen Guddomiyaha, xubnaha ka tirsan, iyo Xoghayaha, go'aanka rasmiga ah ee la xiriira codsiga hantileeyaasha iyadoo la caddeynaaya hantida magdhawga ah iyo intii lagu qiimeeyey magdhawga guud ahaaneed.

**Qod. 11**

Go'aannada kama dambeysta ah ee Guddiga waxaa lagu wargelin doona hantilleyasha sida uu qabo qod. 5 ee sare ku xusan.

**Qod. 12**

Dekreetadaani waxay hirgeli doonta sida ugu dhaqsida badan, waxaana lagu soo qori doona Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqratiga ee Somaliya waxaana lagu keydin doona Keydka Sharciyada iyo Dekreetoyinka Dowladda.

Muqdisho, 1 Maarso 1971.

Madaxweynaha
Golaha Sare ee Kacaanka
**Sareeye Guuto Mohamd Siyaad Barre**